


| | | |
|--|---|----------------------|
| FAAFINTA |  | RASMIGA AH |
| EE | | |
| JAMHUURIYADDA SOMALILAND | | |
| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند | |
| Sanadka: 1aad | Cadadka: 1aad | Taariikh: 04/02/2012 |
| QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. | | |
| RUKUNKA (Subscription): | | |
| <i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh. ee Laga bixiyo Wasaradda Maaliyada</i> | | |
| Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Madaxtooyadda, HARGEYSA, S/L | | |

TUSMADA CADADKA

| | |
|---|--|
| <p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA</p> <p>BAARLAMAANKA IYO</p> <p style="text-align: center;">XEER NIDAAMIYAYAASHA:</p> <p style="text-align: center;"><i>Sooma bixin</i></p> <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER</p> <p>NIDAAMIYAYAASHA IYO</p> <p style="text-align: center;">DIKREETOYINKA</p> <p>MADAXWEYNAHA:</p> <p style="text-align: center;">1) Xil-ka Qaadis; <i>January 02, 2012.</i></p> <p style="text-align: center;">2) <i>Xeer Madaxweyne No.</i> <i>0186/012012, January 02,</i></p> | <p>Bogga</p> <p>3</p> <p>4</p> <p>5</p> <p>16</p> |
|---|--|

| | |
|--|----|
| 2012; Magacaabid. | |
| 3) <i>Xeer Madaxweyne No. 0187/012012, January 04, 2012; Xeer nidaamiyaha Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland.</i> | 17 |
| 4) <i>Xil-ka Qaadis; January 09, 2012.</i> | 18 |
| 5) <i>Xeer Madaxweyne No. 01... 12, January 09, 2012; Magacaabid.</i> | 19 |
| 6) <i>Xil-ka Qaadis; January 09, 2012.</i> | 20 |
| 7) <i>Xeer Madaxweyne No. 0189/012012, January 09, 2012; Magacaabid.</i> | 21 |
| 8) <i>Xil-ka Qaadis; January 09, 2012.</i> | 22 |
| 9) <i>Xeer Madaxweyne No. 0190/012012, January 09, 2012; Magacaabid.</i> | 23 |
| 10) <i>Xil-ka Qaadis; January 09, 2012.</i> | 24 |
| 11) <i>Xeer Madaxweyne No. 0191/012012, January 09, 2012; Magacaabid.</i> | |
| 12) <i>Xeer Madaxweyne No. 0192/012012, January 21, 2012; Cafis Madaxweyne.</i> | 25 |
| <u>QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOOYINKA,</u> | |
| WAREEGTOOYINKA, AMARADA IYO | 27 |
| XEER | |

NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM

*Wasaaradda Cadaaladda: Fulin
Go'aano ka soo baxay Gudiga
Cadaaladda, January 18, 2012*

QAYBTA AFRAAD: AMARADA IYO

GO'AANADA MAAMUL

*Guddida Diiwaangelinta Ururada
Siyaasiga ah iyo Ansixinta Axaabta
Qaranka: Go'aan ka soo baxay
Gudiga, January 14, 2012*

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

Sooma bixin

QAYBTA LABAAD:

XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO

DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

XIL-KA QAADIS, JANUARY 02, 2012:

REF: JSL/M/XILO/249/1-845/012012

DATE: 02/01/12

Ku: Mudane, Maxamed Nuur Xirsi

Madaxa Sirdoonka Qaranka ee Hore ee JSL Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka-Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan Xilkii Madaxa Sirdoonka Qaranka JSL u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darteed, waxaan ku farayaa in aad xilka aad ku wareejiiso, Mudane, Jaamac Maxamed Bootaan, oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Madaxa Sirdoonka Qaranka JSL

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Madaxa Sirdoonka Qaranka JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE NO. 0186/012012, JANUARY 02, 2012;
MAGACAABID.

REF: JSL/M/XERM/249-844/012012

DATE: 02/01/12

XEER MADAXWEYNE

0186/012012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Hay'adda Sirdoonka Qaranku u leedahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo in la dardar geliyo hawlaha Hay'adda Sirdoonka Qaranka JSL;

Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Jaamac Maxamed Bootaan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Madaxa Hay'adda Sirdoonka Qaranka JSL

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE NO. 0187/012012, JANUARY 04, 2012:
XEER NIDAAMIYAHA FAAFINTA RASMIGA AH EE
JAMHUURIYADDA SOMALILAND.

JSL/M/XERM/249-849/012012

04/01/12

XEER MADAXWEYNE 0187/012012

XEER NIDAAMIYAHA FAAFINTA RASMIGA AH EE JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Isaga oo Tixraacaya:

Oodobka 90, Faqradiisa 12aad ee Dastuurka JSL ee tilmaamaya awoodaha Madaxweynaha iyo Oodobka 75aad ee Dastuurka, oo awood gaara u siinayaa Madaxweynaha in uu xeerarka dalka ku soo saaro, kuna baahiyo Faafinta Rasmiga ah;

Isagoo ogsoon:

baahida xooga ah ee loo qabo in xeerarka kala duwan, digreetooyinka rasmiga ah iyo ogaysiisyada lagu baahiyo, laguna faafiyo faafinta rasmiga ah si dhamaan laamaha dawladdu iyo dadweynuhuba ugu baraarugsanadaan dhaqan galka xeerarkaas iyo qoraaladaas;

Isagoo maanka ku haya:

baahida loo qabo in la xaqiijiyo in dhamaan xeerarku ay si sax ah u dhaqangelayaan, loona fulinayo sidii loo dejiyey;

Markuu arkay:

Oodobka 48, Faqradiisa 4aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer Lr. 24/2003) ee dhigaya in Garyaqaanka Guud ee Qaranku uu u xilsaaranyahay in uu faafin rasmi ah ku soo saaro xeerarka dalka;

Wuxuu soo Saaray

Xeer Nidaamiyaha Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland

Qodobka 1aad: Faafinta Rasmiga ah ee JSL

Waxa halkan lagu aasaasay **Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland**. Oo looga golleeyahay in sida ugu dhaqsaha badan loogu baahiyo dhamaan xeerarka iyo go'aamada maamul (Administrative Acts) ee leh saamayn guud iyo ogaysiisyada dadweynaha ee sharcigu dhigayo in la baahiyo ama ay lagama maarmaantahay in ay si rasmi ah u gaadhaan dadweynaha.

Qodobka 2aad: Naqshada iyo hab-qoraalka Faafinta Rasmiga ah ee JSL

1. Bogga hore ee Faafinta Rasmiga ah ee JSL waxaa ka muuqanaya:

- b) Astaanta Jamhuuriyadda Somaliland.
- t) Magaca "Faaafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Somaliland" oo qoral weyn ah iyo isagoo far yar ku qoran Afka Carabiga oo ah "*Al-Nashra Al-Rasmiya Li Jamhuuriyat Somaliland*" iyo Afka Ingiriisiga oo ah "*Somaliland Republic Official Gazette*".
- j) Sanadka iyo taariikhda uu soo baxay.
- d) Tirsiga cadadka.
- x) Qiimaha lagu iibinayo cadadka iyo qiimaha rukunka muddaysan (periodic subscriptions) iyo habka loo bixin karo.
- Kh) Qoraalka muujinaya xafiiska soo saaray.
- D) Tasmada cadadka oo leh tirsiga boggaga.
- R) Waxyaalihii kale ee u muuqda lamahuraan in lagu qoro boggan hore sida habka loola xidhiidhi karo waaxda soo saarta Faafinta .

2. Qoraalada waaweyn, sida xeerarka dhaadheer, waxa lagu soo saari karaa lifaaq dheeraad ah (supplements) oo tirsi leh.

3. Waxaa sanad kasta la soo saaraya bisha Kowaad (*Janaayo*) cadad gaar ah oo si ishaarad ah (Index) u qorayaa cadad kasta oo Faafinta Rasmiga ee soo baxay sanadkii dhamaadey tirsigeeda, taariikhda uu soo baxay iyo dhamaan magacyadda iyo lambaradda xeer kasta (nooc kasta ha ahaade) ee cadad kasta sanadkaa ku soo baxay.
4. Faafinta Rasmiga ah ee JSL waxa sidoo kale lagu soo saarayaa hanaanka elektrooniga ah iyada oo baahinteeda iyo qaabka loo heli karo uu dejinayo, waxna ka bedelli karo Garyaqaanka Guud ee Qaranka.

Qodobka 3aad: Tusmada Cadadka

1. Cadad kasta oo Faafinta Rasmiga ah waa in ay caadiyan tusmadiisa u taxnaantaa hanaankan:
 - b) **Qaybta koowaad** oo ay ku jiraan Xeerarka iyo xeer-nidaamiyayaasha ay ansixiyeen Baarlamaanka iyo Madaxweynaha oo u kala horeeya taariikhda uu Madaxwynuhu saxeexay.
 - t) **Qaybta Labaad** oo ay ku jiraan digreetooyinka iyo Xeer Nidaamiyayaasha Madaxweynuhu soo saaray ee ka mid ahayn kuwa Qaybta Koowaad ee faqradan ku xusan.
 - j) **Qaybta Sadexaad** oo ay ku jiraan digreetooyinka iyo xeer nidaamiyayaasha wasiiradda, amarada (orders), wareegtooyinka, xeer hoosaadyada, qaraarada (resolutions), xeerarka hoose ee Golayaasha Degmooyinka iyo Gobolada iyo warbixinada rasmiga ah ee dawlada.
 - x) **Qaybta Afraad** oo ay ku jiraan ogaysiisyada ay waaxyaha dawladu u bahanyihiin in dadweynaha qoraal rasmi ah lagu gaadhsiiyo, ogeysiisyada maxkamadaha, iyo Qandaraasyada dawlada.
 - kh) **Qaybta Shanaad** oo ay ku jiraan ogeysiisyada shirkadaha (companies) iyo ururada samafalka ama xirfadlayaasha (professionals) ama shaqaalaha ee xeer hoosadyadoodu amaba xeerarka dalku ay ku amrayaan in ay xubnahooda amaba dadweynaha u baahiyaan waxyaalo la xidhiidha

hawlahooda, kuwaas oo iyagu ajuuro ka bixinaya daabacaada, haddii uu ogeysiiskoodu ku haboon yahay in lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

Waxyaalaha kale ee lagu dari karo qayb kasta waxa sii faahfahinaya Qodobka 8aad ee Xeer Nidaamiyahan

2. Lifaagyada dheeraadka ah (supplements) ee ku xusan Qodobka 2aad, Faqradiisa 2aad ee Xeer Nidaamiyahan, waxa keliya oo ku jiraya, xeerka ama xeerarka gaarka ah ee loogu talo galey in gooni loogu baahiyo.
3. Ishaaradda Sanadlaha ah (Annual Index) ee ku xusan Qodobka 2aad, Faqradiisa 3aad waxa liiska xeerarka cadad kasta oo sanadkaa soo baxay loo kala qaybiniya siday u kala yihiin kuwa ku xusan Faqradda 1aad(b) ilaa (j) ee Qodobka.

Qodobka 4aad: Taariikhda Daabacaadda

1. Cadad kasta oo Faafinta Rasmiga ah waa in, intii suuragal ah, la soo saaraa Sabtida u horeysa ee bil kasta marka laga reebo sabtida ku beeganta fasaxyada guud (public holidays) iyada oo cadadkaasi soo baxayo maalinta shaqo ee ku xigta.
2. Cadadyadda iyo lifaaqyadda dheeraadka ah waxa la soo saari karaa, markasta oo ay lamahuraan noqoto iyada oo la door bidayo maalinta sabtida.

Qodobka 5aad: libinta iyo qaybinta

1. Qiimaha Faafinta Rasmiga ha waxa lagu jaangoynayaa wareegto uu soo saaro Garyaqaanka Guud markuu la tashado Wasiirka Maaliyada.
2. Wasaardaha iyo laamaha kale ee dawladda oo ay ku jirto Garsoorka waa in loo qaybiyaa cadadyo ay korka kaga qorantahay “Nuqul Dawli – Lama iiban karo” (Official Copy – Not for Sale). Qaybinta nuquladan iyo tiradooda hay’ad kasta la siinayo waxa go’aaminaya Garyaqaanka Guud.

Odobka 6aad: Luqadda Rasmiga ah ee Daabacaadda

1. Faafinta Rasmiga ah ee JSL waxaa lagu daabacayaa Af-Soomaali, islamarkaana xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah iyo qoraalada kale marka loo baahdo waxa lagu daabici karaa afafka Carabiga iyo Ingiriisiga.
2. Haddii aan xeerar ama wareegto ama qoraal aanu si kale u dhigin, wixii iska hor imaad ah ee ka dhasha qoraalo isku mid ah balse ku qoran luqado kala duwan, waxaa mudnaanta leh midka ku qoran Af-Soomaaliga.

Odobka 7aad: Sharciyada (legislation) iyo Go'aanada Maamul

1. Sharciyada lagu daabacayo **Qaybta Koowaad** ee Faafinta Rasmiga ah waa in aay ku jiraan:
 - b) Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo soo jeedinta wax ka bedelka iyo dib u eegista Dastuurka.
 - t) Nuqulada heshiisyada caalmiga (international treaties) ah ee Jamhuuriyadda Somaliland la gasho daraf kale iyo xeerarka lagu hirgeliyey (ratification).
 - j) Xeerarka iyo Xeer-nidamiyayaasha uu ansixiyey Baarlamaanku, Madaxweynuhuna saxeexay oo ay la socdaan ansixinta Baarlamaanka iyo ogolaanshaha Madaxweynahu.
 - x) Miisaaniyada Qaranka iyo Xeerka Miisaaniyadda, iyo sidoo kale Miisaaniyadda kaabidda ah ama wax ka bedelka ah ee ay ansixiyeen Golaha Wakiiladu.
 - kh) Xeerarka deg-deg ah ee Madaxweynuhu kusoo saaro si waafaqsan Odobka 92aad ee Dastuurka iyo go'aanada Baarlamaanku ka gaadho.
2. Sharciyada kale ee ay tahay in lagu faafiyo **Qaybta Labaad** ee Faafinta Rasmiga ah waxaa ka mid ah:

- b) Xeer-nidaamiyayaasha uu soo saaray Madaxweynuhu iyada oo xeer awood u siinayo.
 - t) Xeer-nidaamiyayaasha ay soo saaraan Wasiiradu ee xeer awood u siinayo.
3. Go'aanada maamul iyo amarada kale ee ay tahay in lagu daabaco **Qaybta Sadexaad** ee Faafinta Rasmiga ah ee JSL waa in ay ku jiraan:
- b) Wareegtooyinka iyo Amarada Madaxweynaha oo ay ku jiraan magacaabista iyo xil ka qaadista.
 - t) Wareegtooyinka, amarada iyo wareegtooyinka maamul ee Wasiirada.
 - j) Amarada maamul ee madaxda laamaha kale ee dawladda.
 - x) Xeer Hoosaadyada Dawladaha Hoose ee Degmooyinka iyo Gobolada.
 - kh) Qaraarada ama baaqyada rasmiga ah ee dawlada ee u baahda in loo fidiyo si rasmi ah.
 - d) Qaraarada, ogeysiisyada iyo warbixinada rasmiga ah ee Golayaasha Sharci dejinta ee ay ogolaadaan in la daabaco Gudoomiyayaashu.
 - r) Xeer Hoosaadyada Labada Gole ee Sharci-dejinta iyo Gudiyadooda.
 - s) Xeer Hoosaadyada Hay'adaha kale ee Dawladda ah ee aan lagu soo saarin xeer ama xeer-nidaamiye.
 - sh) Natiijooyinka kama danbaysta ah ee doorashooyinka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Baarlamaanka, Golayaasha Deegaanka iyo natiijooyinka kama danbaysta ah ee aftiyada.
 - dh) Barnaamijyada dawladda ee uu ansixiyo Baarlamaanku iyo warbixinada wax qabadka.
 - c) Warbixinada wax qabadka dawlada iyo warbixinada fulinta miisaaniyadda dalka.
 - g) Warbixinada kama dambaysta ah ee arrimaha loo saaray Guddi baadhis ama Guddi talo- bixineed oo loo igmaday in ay arimahaas warbixino ka soo saaraan.

4. Ogaysiisyada, hadalada ama xayaysiisyada caamka ah ee ay tahay in lagu daabaco Qaybta Afraad ee Faafinta Rasmiga ah ee JSL waa in ay ku jiraan:
 - b) Ogaysiisyada ay daabacaadooda sharcigu rabo.
 - t) Ogaysiisyada maxkamadeed ama garsoorka.
 - j) Ogaysiisyada daabacaadooda uu farayo Xeerka Shirkadaha (Companies Law), xeer hoosaadyada shirkadaha caamka ah ama kuwa gaarka loo leeyahay, ururada, jaamacadaha, mu'assasadaha iyo ururada aan dawliga ahayn.
 - x) Wixii kale ee aan ku saabsanayn dawlada ee in la daabaco sharcigu amrayo.

Qodobka 8aad: Xaqiijinta (Verification) nuqulada la daabacayo

1. Dhamaan sharciyadda (legislation) oo ay ka mid yihiin xeerarka iyo Dastuurka, xeer-nidaamiyayaasha, digreetooyinka, wareegtooyinka, amaradda ku xusan Qodobka 7aad, Faqradaha 1aad ilaa 3aad, ee Xeerkan, ee ay tahay in lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JSL waa in uu xaqiijiyaa Xafiiska Garyaqaanka Guud, lagumana daabici karo Faafinta Rasmiga ah ilaa inta aanu nuquladooda xaqiijin (verified) Xafiisku.
2. Wareegtooyinka maamul, ogaysiisyada Maxkamadaha, ogaysiisyada laamaha dawladda iyo ogeysiisyada caamka ah ee dawliga, waa in uu xaqiijiyaa sarkaal sare oo ka tirsan cidda soo saartay. Wasiirka ama Madaxa hay'adda ay khusayso ayaa soo saaraya liiska jagooyinka saraakiisha sar sare ee awood u leh in ay xaqiijiyaan nuqulada Faaafinta lagu daabacayo.
3. Garyaqaanka Guud ayaa ku soo saaraya tilmaamo ashkhaasta caddayn kara ama sugi kara ogoysiisyada caamka ah ee shariikadaha, ururada (associations) iyo ururada aan dawliga ahayn, isla markaana cayimaya ajuurada laga qaadayo ogaysiisyadaas.

4. Garyaqaanka Guud waa inuu xadidaa waqtiga kama dambaysta ah ee qoraalka la xaqiijiyey, ee asalka ah iyo nuqulada elektrooniga ah loo gudbinayo madbacadda si loo daabaco iyo hannaanka ay tahay in loo maro si loo daabaco arimaha degdega ah.

**Odobka 9aad: Muujinta iyo tirsiga
Sharciyada iyo amarada la daabacayo**

1. Dhamaan sharciyada (legislation) la daabacayo waa in lagu muujiyaa magacooda, lambarka taxanaha ah ee ay siiyeen Golayaasha Baarlamaanku iyo taariikhda uu saxeexay Madaxweynuhu. Baarlamaanka ayaa xeer kasta ama xeernidamiye kasta oo uu soo saaro magac iyo tiro u gaar ah siinaya. Haddii wax ka bedel xeer ama xeer nidaamiye aan cinwaan ama tiro gaar ah la siina, waxaa daabacaada wax ka bedelka lagu daraya weedha ah ‘**wax ka bedel**’ iyo taariikhda uu Madaxweynuhu ansixiyey.
2. Dhamaan wareegtooyinka, amarrada maamul iyo xeer-hoosaadyadu waa in ay muujiyaan noocooda, magaca cida soo saartay, cinwaankeeda, lambarka tixraaca iyo taariikhda la saxeexay iyo taariikhda ay dhaqan gelayaan.
3. Tixraac buuxa (full reference) ee xeer kasta, xeernidamiye, wareegto ama amar, marka la daabacayo ee ay ku soo baxaan Faafinta Rasmiga waxa lagu darayaa cadadka Faafinta Rasmiga ee ay ku soo baxeen iyo taariikhda la daabacay cadadkaas.

**Odobka 10aad: Daabacaadda nuqul isku duub ah
oo xeer wax badan laga bedellay**

1. Haddii xeer wax badan ama dhawr jeer wax laga bedellay, waxa marka uu ogolaado Shirgudoonka Golaha Wakiilada, lagu daabacayaa Faafinta Rasmiga ah xeerka iyo wax ka bedelkiisa oo dhan oo ah nuqul isku duuban (consolidated copy).
2. Garyaqaanka Guud ayaa kala tashanaya Gudoomiyaha Golaha Wakiilada marka ay la noqoto in loo baahanyahay isku dhafka wax

ka bedelaada xeer si loogu daabaco nuqul isku duuban (consolidated copy).

Qodobka 11aad: Sixitaanka

1. Sixitaanka, waxa keliya oo la ogolaan karaa hadii ay la xidhiidhaan khalad xagga maadiga ah oo ka dhashay kala duwanaansho u dhexeeya qoraalka asalka ah iyo ka lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah. Sixitaanka waxa lagu codsan karaa qoraal rasmi ah oo ka soo baxay hay'ada markii hore ansixisay qoraalka asalka ah.
2. Haddii kala duwanaanshuhu uu yahay khalad madbici ah, waxaa sixitaanka samaynaya Madbacadda markuu ka talo bixiyo Garyaqaanka Guud.
3. Sixidda waxa lagu daabacayaa qaybta Faafinta Rasmiga ah ee JSL ee hore loogu daabacay qoraalka la saxayo.
4. Haddii murug ka yimaado fahamka qoraalka la saxayo, qoraalka la saxay dib baa loo daabici karaa qayb ahaan ama guud ahaanba.
5. Sixidu ma saamaynayso taariikhda uu dhaqan gelayo qoraalka rasmiga ah ee la saxay.

Qodobka 12aad: Garyaqaanka Guud

1. Xafiiska Garyaqaanka Guud ayaa leh masuuliyadda koowaad ee xaqiijinta in dhamaan sharaciyada (xeerarka iyo xeernidamiyayaashu) ay ansixiyeen baarlamaanku, ee uu saxeexay Madaxweynuhu, lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JSL si sax ah oo waqtigeedii ah.
2. Xafiiska Garyaqaanka Guud wuxuu hubinyaa in cadadka Ishaarada Sanadlaha ah (Annual Index) ee ku xusan Qodobka 3aad,

Faqradiisa 3aad ee Xeer Nidaamiyahan uu si sax ah u soo baxo bilowga sanad kasta.

3. Xafiiska Garyaqaanka Guud wuxu abaabulayaa marka ay suurta gasho in dhamaan cadadyada Faafinta Rasmiga ah ee soo baxa sanad kasta laysugu xidho buugaag ahaan (bound volumes) si loo kaydiyo.

Qodobka 13aad: Hay'adaha Dawlada

Wasaaradaha, hay'adaha dawlada ee madaxa banaan, laamaha garsoorka, iyo dhamaan waaxyaha dawlada oo ay ku jiraan Dawladaha Hoose, waxaay Xafiiska Garyaqaanka Guud u soo gudbinayaan dhamaan nuqulada asalka ah ee ku xusan Xeer Nidaamiyahan, waxayna Faafinta Rasmiga ah ee JSL markay soo baxdo ku dhex faafinayaan, kuna keydinayaan hay'adahooda.

Qodobka 14aad: Wax ka bedelka Xeeridamiyayaasha iyo Awaamiirta

1. Xeer Nidamiyahan waxaa wax lagaga bedeli karaa amar Madaxweyne, marka ay daruuri noqoto, wareegto Madaxweyne.
2. Garyaqaanka Guud wuxu soo saari karaa, marka ay daruuri noqoto, awaamiir lagu fulinayo Xeer Nidaamiyahan.

Qodobka 15aad: Daabacaadda

Faafinta Rasmiga ah ee JSL waxaa lagu daabacayaa Madbacadda Qaranka. Haddii aan Madbacadda Qaranku daabici karin Faafinta Rasmiga ah, Garyaqaanka Guud waxa uu u diri karaa madbcad kale ilaa inta Madbcadda Qaranku ay awood u yeelanayso in ay daabacdo.

Qodobka 16aad: Tirtirid

Xeer nidaamiye kasta oo khilaafaya qodobada Xeer Nidaamiyahan waxaa lagu baabiyey Xeer Nidaamiyahan, waana wax kama jiraan.

Qodobka 17aad: Dhaqan galka

1. Xeer Nidaamiyahani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynaha JSL saxeeexo.
2. Haddii daabacaadda Faafinta Rasmiga ah ee JSL aanay nidaamka iyo waqtiyadda uu sheegay Xeer Nidaamiyahani u suurtoobin ka dib marka Xeerkani dhaqan galo; Garyaqaanka Guud waxa uu amar ahaan, si ku meel gaadh ah, u habaynayaa in daabacaadda qaybaha koowaad ilaa sadexaad ee Faafinta Rasmiga ah ee JSL loo daabaco laguna qaybiyo hannaanka elektrooniga ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XIL-KA QAADIS, JANUARY 09, 2012:

JSL/M/XILQ/249/1-858/012012

09/01/12

Ku: Mudane, Cali Cabdi Hurre
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Sanaag Ceerigaabo

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka-Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan xilkii Gudoomiyaha Gobolka Sanaag u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darted, waxaan ku farayaa in aad xilkaa aad ku wareejiiso, Mudane, Aaden Diiriye Cigaal oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Sanaag.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiyaha Gobolka Sanaag.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE 0188/012012, JANUARY 09, 2012;
MAGACAABID.

JSL/M/XERM/249-855/012012

09/01/12

XEER MADAXWEYNE

0188/012012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha
Goboladu u leeyihiin dhismaha Qaranka
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada
Gudoomiyaha Gobolka Sanaag
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay arrintani khusayso
- Markuu ku Qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u
leeyahay jagadan

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Aaden Diiriye Cigaal, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Sanaag ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XIL-KA QAADIS, JANUARY 09, 2012:

—18—

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL

JSL/M/XILO/249/1-859/012012

09/01/12

Ku: Mudane, Cali Aaden Meecaad
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Gabiley Gabiley

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka-Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan xilkii Gudoomiyaha Gobolka Gabiley u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darted, waxaan ku farayaa in aad xilkaa aad ku wareejiiso, Mudane, Xuseen Cumar Magan oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Gabiley.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiyaha Gobolka Gabiley.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE 0189/012012, JANUARY 09, 2012:

MAGACAABID.

JSL/M/XERM/249-856/012012

09/01/12

XEER MADAXWEYNE

0189/012012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha
Goboladu u leeyihiin dhismaha Qaranka
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada
Gudoomiyaha Gobolka Gabiley
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay arrintani khusayso
- Markuu ku Qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u
leeyahay jagadan

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Xuseen Cumar Magan, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Gabiley ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XIL-KA QAADIS, JANUARY 09, 2012;

JSL/M/XILQ/249/1-860/012012

09/01/12

Ku: Mudane, Cabdi Daahir Xasan
Guddoomiye Ku-xigeenkii Hore ee Gobolka Togdheer-Burco

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha -Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka-Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan xilkii Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Togdheer u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darted, waxaan ku farayaa in aad xilkaa aad ku wareejiso, Mudane, Maxamed Maxamuud Yuusuf oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Togdheer.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

REF: JSL/M/XERM/249-857/012012

09/01/12

XEER MADAXWEYNE

0190/012012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha
Goboladu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada
Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka
Togdheer;
- Markuu la Tashaday: Madaxda ay arrintani khusayso;
- Markuu ku qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u
leeyahay jagadan;
- Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Maxamed Maxamuud Yuusuf, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Togdheer ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XIL-KA QAADIS, JANUARY 09, 2012:

JSL/M/XILQ/249/1-862/012012

09/01/12

Ku: Mudane, Yaasiin Muxumed Cabdi
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Togdheer

Burco

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahad celinayaa mudadii aad u soo shaqaynaysay Qaranka, wakhtigan xaadirka ah waxa aan gartay in aan xilkii Gudoomiyaha Gobolka Togdheer u magacaabo masuul cusub oo xilkaasi guta.

Sidaa darteed, waxaan ku farayaa in aad xilka aad ku wareejiso, Mudane, Cabdoo Axmed Aayer oo aan u soo magacaabay in uu noqdo Gudoomiyaha Gobolka Togdheer.

Waxaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Gudoomiyaha Gobolka Togdheer.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE 0191/012012, JANUARY 09, 2012:
MAGACAABID.

JSL/M/XERM/249-861/012012

09/01/12

XEER MADAXWEYNE
0191/012012

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha
Gobolladu u leeyihiin dhismaha Qaranka
- Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada
Gudoomiyaha Gobolka Togdheer
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay arrintani khusayso
- Markuu ku Qancay: In uu buuxin karo, aqoon iyo kartina u
leeyahay jagadan

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdoo Axmed Aayer, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Togdheer ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER MADAXWEYNE NO. 0192/012012, JANUARY 21, 2012;
CAFIS MADAXWEYNE

REF: JSL/M/XERM/249-883/012012

21/01/12

XEER MADAXWEYNE

0192/012012

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa 5aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qoraalka codsiga ah ee ay soo qorteen Odayaasha kala ah Suldaan carab Cabdi

Cali, Sheekh Axmed Maxamuud
Maxamed iyo Axmed Jaamac Ducaale;

Markuu La Tashaday: Mas'uuliyiinta ay arrintani khusayso;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud

Wuxuu go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Faarax Maxamuud Maxamed, oo qaranimada Somaliland ka soo hor jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Cadaaladda

WC/XW/G-02/600/12

18/01/2012

| | |
|--|-------------|
| Ku: Raadyow Hargeysa, | =Hargeysa |
| Ku: Telefishanka Qaranka SLNTV, | =Hargeysa |
| Ku: Wargeyska Jamhuuriya, Ogaal, Geeska Africa | =Hargeysa |
| Og: Guddoomiyayaasha Gobolada JSland, | =Fadhigooda |
| Og: Dhamaan Guddoomiyayaasha Maxk,Racfa,Gobol,Degmo | =Fadhigooda |
| Og: Guddoomiyaha Maxkamada Sare JSL | =Hargeysa |
| Og: Madaxweynaha JSland | =Hargeysa |

UJ: FULIN GO'AANO KA SOO BAXAY GUDIGA CADAALADDA.

Wasaaradda Cadaaladda ee JSL, iyadoo cuskanaysa Qodobka **106aad** ee Dastuurka Qaranka Farqadiisa **1aad**, kaas oo

qeexaya in ay Wasaaradda Cadaaladdu u xilsaaran tahay Fulinta Go'aanada Guddiga Cadaaladda.

Sidaa darteed, waxaanu halkan ku faafinaynaa Go'aanka Lambarkiisu yahay **MS/GGC/G-3/10/2012 ee 10/01/2012.**

WAXAY GO'AAMISAY.

QOD. 1aad

SHAQO KA-SARID.

Waxaa Shaqadii Garsoorka laga saaray Garsoorahan hoos ku qoran:-

1. **Nuur Maxamed Ducaale**, oo ahaa Garsoore Maxkamadda Degmada Boorama.

QODOBKA 2AAD

BEDEL GARSOORE

1. **Sh. Muuse Cukaashe Rayaale**. Waxaa laga bedelay Guddoomiyaha Maxkamada Degmada Lughaya, waxaana loo bedelay Garsoore Maxkamada Degmada Boorama.

QODOBKA 3AAD

MAGACAABIS GARSOORAYAAL.

1. **Yaxye Cali Idiris**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamadda Gobolka Hargeysa.
2. **Cabdiraxmaan Maxamed Mawliid**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Hargeysa
3. **Mustafe Cabdi Cali Ducaale**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Racfaanta Saaxil.
4. **Maxamed Axmed Faarax**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Berbera
5. **Cabdiraxmaan Xuseen Caynaan**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Gobolka Awdal.

6. **Sh. Axmed Daahir Bilaal**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Lughaya.
7. **Sh. Cali C/laahi Jaahuur**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Burco.
8. **Aadan Cali Xuseen**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Burco.
9. **Sh. Cabdi Xasan Cumar**, waxaa loo Magacaabay Guddoomiyaha Maxkamada Degmada Oodweyne.
10. **Maxamed Xaaji Faarax Cabdi**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Caynaba.
11. **Jaamac Maxamed Ibraahim Xaraare**, waxaa loo Magacaabay Garsoore Maxkamada Degmada Baligubadle

ALLAA MAHAD LEH,

(Xuseen Axmed Caydiid)

WASIIRKA W/CADAALADDA & GARSOORKA.

Jamhuuriyadda Somaliland

Xafiiska Guddiga Diiwaangelinta Ururada
Siyaasadda iyo Ansixinta Axaabta Qaranka

GDU/AAS/66/2012

14/1/2012

Go'aan Guddi

Guddida Diiwaangelinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Axaabta Qaranka iyadoo ka duulaysa falanqayntii iyo qiimayntii ay ku samaysay Ururada hoos ku qoran.

Waxay Go'aamisay in ay maanta oo ay taariikhdu tahay 14/1/2012 ay Ururadani u gudbeen Marxaladii labaad ee howlgalka.

Ururada u Gudbay Marxaladii Labaad:-

WADANI, DALSAN, NASIYE, GURMAD, RAYS, UMMADDA, JAMHUURIGA, UDHIS, NDB, HORYAAL, BADBAADO, DAMAL, SSCD, NUUR, XAQSOOR.

Saxeexa Magacyada Guddida Diiwaangelinta Ururada Siyaasada:-

1. Abdirisaaq Jaamac Cumar (Guddoomiye).....
2. Aadam Geedi Qayaad (G/ku-xigeen).....
3. Cumar Xasan Axmed (Xoghaye).....
4. Xasan Axmed Ducaale (Afhayeen).....
5. Cabdale Ibraahim Maxamed.....
6. Maxamed Cabdimaalik.....
7. Ismaaciil Cabdillaahi Cali.....